# RAG IS GURAYE:

## SIYAAD BARE *VS* DR. BULXAN




Bahda Mareegta Farshaxan
Janaayo 2023

Marka aanad aqoon u laheyn habdhaqanka siyaasadeed iyo xeerarka u yaala dalalka aad la xidhiidheyso ama la dhaqmeyso waxaa la arkaa inaad meel cidlo ah haahaabato.Madaxweynaha dawlada Federaalka ee Soomaaliya,Xasan Sh.Maxamuud,ayaa waxaa  xilalkii ugu horeeyey ee uu magacaabey markii la doortey bishii May 15dii,2022 uu noqdey inuu isla maalintii xigtay( May 16,2022)u magacaabo Sh. Sheriif Sh.Axmed noqdo ergayga  wadahadalada Dawlada Federaalka Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Soomaaliland.

Waxaa la wada ogsoon yahay Sh. Shariif Sh. Axmed iyo Axmed Maxamed Maxmuud SIilaayo inay wadahadaladaa bilaaben gu'gii 2012kii.Hase yeeshe Markii uu xilka la wareeay Xasan Sh. Maxamuud waxaa bilaabmey in ay wadahadaladii socon waayeen, sidoo kale in heshiis kasta oo ka horeeyey uu hirgelin kari waayey.

Sidoo kale ayuu maalgelin mugeeda leh Xasan Sh. Maxamuud ku bixiyey kaalmeynta urur laga aasaasey Maraykanka oo lagu suntay Somali American Alliance ,isagoo ku ladhey in uu shaqo galiyey dilaal aan aqoon badan u laheyn arimaha ay Soomalailand iyo Dawlada Federaalku isku hayaan.

Xasan Sh. Maxamuud Oo intaasoo hawl galay ayaa ismoodsiiyey inay u suurtogeliyeen inuu helay goobo laga gali karo siyaasada Maraykanka oo joojin karta ama dib u dhigi karta xeerka iskaashiga ee dawladaha Maraykanka iyo Soomaaliland aaney hagayaan ciidamada Maraykanku.

Xasan Sh. Maxamuud Wuxuu ka soo qayb galay kulankii guriga Cad ee Maraykanku layskugu yeedhay madaxda dawladaha Afrikaanka. Sawir uu Xasan Sh.Maxamuud la galay madaxweynaha Maraykanka Joe Biden iyo marwadiisa Jill Biden ayuu u qaatey inay sii xoojineyso hawlgalkii ay wadeen ururka la malmaluuqay ee Somali American Alliance iyo dilaakii la maalgeliyey.Sidaa darteed ayuu Xasan Sh.Maxamuud Ku baahiyey baraha bulshada isagoo kaalmo laxaad leh ka dayey.Isagoo Xasan Sh. ku dhex jira riyooyinkaa xaqiiqada ka baxsan oo uu joogo Washington DC ayuu ka warhelay in xeerkii Iskaashiga dalalka Maraykanka iyo Soomaaliland la meelmariyey oo uu caawana ( habeenkii Jimcuhu soo galay) la hor keenayo madaxweynaha Maraykanka Joe Biden si uu qalinka ugu duugo.

Maryihii ka yaaley qolka la dajiyey ayuu Xasan Sh. si deg deg ah u urursadey, isagoo naftiisa kula hadaaqaya hawlgalkii aanu galnay maxaa ku dhacey.Waxaanu dareemay inuu foosto gun la’ dhaaminayey, kana caraabey wadanka Maraykanka,naftana la doontay casiirkii wadanka Qadar ee u nugul siduu is leeyahay.

Sheekadaasi waxay i xasuusisay wixii kala qabsadey Siyaad Bare iyo Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan horaantii bishii Maarso ee

gu'gii 1982kii.Sida u caado ah wadamada reer galbeedka markuu wafdi uga imanayo wadan ka mid ah wadamada soo koraya waxay diyaariyaan warbixin ku saabsan :

1- Xaalada uu wadanku ku sugan dhaqaale ahaan, siyaasada ahaan,iyo Mabda' ahaan.
2- Xog faahfaahsan oo xambaarsan kuna saabsan xubnaha wafdiga.
3- Sidoo kale ujeedada socdaalka oo lagu salaynayo danta laga leeyahay sida lagu heli karo.
4- IWM.


THE NEW YORK TIMES, FRIDAY, MARCH 5, 1982

ESSAY

The Buck Never Ends

By William Safire

New Ax, Old Shield

By Frances Fox Piven and Richard A. Cloward

Don't Aid Somalia

By Hussein Abdilahi Bulhan

The Carey-Koch 2d Ave. Westway

By John B. Oakes

HELPING OTHERS

DO THE BEST THEY CAN

GANNETT

MAR 5, 1982

Sidii darteed ayaa wuxuu wadanka Maraykanku diyaariyey xogtii wadankii la odhan jirey Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaaliya dabayaaqadii horaantii 1980kii ,laguna suntay Somali Study 1981. Sidoo kale ayaa xog dheeraad ah laga hayey dhacdooyin yaab lahaa oo ka dhacey dalka,siiba magaalooyinka Hargeysa,Berbera, Gabiley,iyo Burco oo ku saabsaneyd kacdoonkii ardeyda iyo sababta keentay. Kacdoonkaasi wuxuu dhacey bishii Febraayo 20dii, ee isla gu'gaas 1982kii.Bulshadaa ay ardeydu hageysey ee kacdoonka sameeyey waxay ka gadoodeen aqoonyahankoodii iyo waayeelkoodii oo lala beegsanayey dil togasho ah.Sidoo xogta la helay waxaa ka mid aheyd in aqoonyahankaasi ay waxbarashada ku qaateen dalkan Maraykanka oo tixgelintooda

lahaa.Waxaana qoraalo yaab leh ka soo saarey guddida aqoonta Sayniska ee Dalka Maraykanka.

Waxaa balanta socdaalka Siyaad Bare iyo wafdigiisu ay ku beegnayd bisha Maarso 9da ee isla gu'gaa 1982kii.Bishii Feraayo dabayaaqadeeii ilaa bishii Maarso 2dii ayaa waxaa maansooyin dhawr ah tiriyey abwaano ay ka mid ahaayeen Cali Sugule"Dun Carbeed"-IHUN-,Aadan Tarabi Jaamac,iyo Maxamed Ibraahin "Hadraawi"-IHUN-.Dhamaan maansooyinkaasi waxay ka waramayeen dhacdadii xadhiga aqoonyahanadii UFFO iyo kacdoonkii ay ardeydu hogaaminayeen. Hase yeeshee maansada Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi" waxay ka warameysay socdaalo uu Siyaad Bare ugu kala direy wafdiyo kala duwan isla xilligan dalalka aduunka oo dawarsi sal ku lahaa,kan Maraykanka uu ku imanayo bisha Maarsana uu ka mid ahaa.Waxay maansada oo ka warameysaa socdaaladii iyo sida uu ugu hungoobi doonaba ay tidhi:

Wallee hagar daamo
Higlooy gabbalkaa dhac
Hegaan hega gaalli
Bidhaan had-hadowga
Jibaanjib hunnuunnu
Hambaaber mardaali
Kallaal himbiriirsi
Sadaad herimooya
Sareedo hamboori
Falaad habbabbaale
Garaad himhimowle
Humbaalle dhaqaaqa
Hallaasiga sheelka
Hiliiliqa jeexa
Galbeed hiyi raaca
Shirqool la hadaafka
Hinraag qayayaabka
Hantaatac ergeynta
Walaaac haghagoodka
Hamuun taltalawga
Heshiis macaluulka

Falkaagu habeensay
Hangaalli hungaalli
Hunjaalli hantoolli
Hiwaali hahoodka
Huraalka hiraalka
Hadeedab mardaadi
Hawaawir hayaayir
Hunnnuushle hannaashle
Hankooble hayooshe
Hanquusle halowle
Hayaayub xumaanta
Hallaallimo soofka
Harawsiga qaawan
Higiishis boqoolka
**Maraykan** ku hiilka
Habheeb alalaaska
Haraaryada neefta
Hagaas caga jiidka
Tawaawac higgoodka
Calaacal hungowga
Hunfey salsalaaxa

Hinfaal wax u sheegga
Hoggaanno samaynta
Hareero ka leefka
Rogaal halalleyda
Higgaadda shanlleyda
Hadhauudhku Carraale

Wasiiro habaynta
Hadhuubada daatay
Jalbeebta hal leyda
Hamaal shaqalkeeda
Halkaan ka abbaaray
Huftoo hufmi waaye

Maxaad kala haadin?

Dawlada Maraykan oo xogtaa iyo in ka badanba haysa ayuu Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan qalinka hinjiyey,kuna qorey qoraal xogtaana sii xoojiyey,in kaloo badana daaha ka sii fayday. Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan wuxuu qoraalkaa ku suntay : " Do not Aid The Dictator(Ha u kaalmeynina keligii taliye)".Qoraalkii ayaa xafiis kasta oo looga taliyo dawlada Maraykanka albaabkiisa garaacey,u diyaargarawgii soo dhaweynta Siyaad Bare ayuu qoraalku ka mid noqdey in lagu daro go'aamada hagaya in kaalmo la siiyo Siyaad Bare iyo Dawladiisa iyo in afka dhulka loogu dhufto sidii ay ka yeeleen wadamadii kale ee Yurubta iyo Carabtuba.

Qoraalkaa wuxuu Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan qorey isla bishaa Maarso 5dii ee gu'gaa 1982kii, waxay dhawr maalmood ka hadhsanaayeen soo dhaweyntii Siyaad Bare iyo Wafdigiisa ay ku imanayeen Cariga Maraykanka oo ku soo aadanayd isla bishaa Maarso 9da ee isla gu'gaa 1982kii.

Maamulkii Siyaad Barre (Afweyne) si uu cago-jiidka reer galbeedka ee ka soo bilaabmey Noofember,1977kii uu wax uga badalo ayuu socdaalkan ididiiladiisu aheyd inuu helo kaalmo dhaqaale. Kaalmadaasi ayaa ku aadanayd in la siiyo hub uu si gaar ah u tilmaamey oo si cad ugu xardhaneyd codsigiisii.

Hase yeeshee aqoonyahan Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan ayaa qoraalkiisu gudbinayey xog qoto dheer oo warkey dawlada

Maraykanku hayeen u sii balbalaadhiyey,meelaha qaarkoodna xog cusub ugu deeeqday ayuu la wadaagey.Dr.Xuseen Cabdilaahi Bulxan wuxuu wargeyska afka dheer ee New York Times oo kaalin mug iyo miisaan leh ka gala wargelinta dadka iyo maamulka dawlada Maraykanka ku soo bandhigay qoraal uu isagu ugu magac darey:"DO NOT AID THE SOMALI DICTATOR", hase yeeshee tifatirihii wargeysku ku soo koobay : "DO NOT AID SOMALIA". Waxaase mudnaanta lahayd inaan tifatiruhu xaq u lehayn inuu xogta qoraalka wax ka badalo, laakiin uu xaq u leeyahay in uu sumada qoraalka wax ka badali karo.

Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan ayaa sidaa ku qancey,kol haddii xogti iyo fariintii u qoraalku gudbinayey ay sumadana ka muuqato,gudaha qoraalkana sidii uu u qorey ay ugu dhigan tahay.

Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan wuxuu qoraalkiisa ku bilaabey in socdaalka uu Madaxweyne Siyaad Bare ee la filayo inuu ku yimaado Salaasada (Maarso 9, 1982) ay dawlada Maraykanku ula dhaqanto si ka fiirsasho leh oo digtooni badani ka muuqato. Waxaanu Dr. Bulxan intaa sii raaciyey in uu Siyaad Bare la shir iman karo laba arimood oo u muuqan kara inay soo jiidan karaan indhaha Dawlada Maraykanka, lana falgeli karaan danaha siyaasada Maraykanku ka leeyahay geeska Afrika.

Waxaanu Dr. Bulxan qalinka ugu duugay labadaa arimood sidan : "Gargaar dheeraad ah oo loo fidiyo Soomaaliya laguna salaynayo culeyska qaxootiga kala firiqsan ee dagaalkii lala galay Itoobiya uu keensadey iyo dhaqaalaha aan salka u fadhiyin waxay raaligelin kartaa Guriga Cad, sidoo kale deeqda uu Siyaad Bare ku bixinayo saldhiga Berbera ee ku dhagan gacanka Carbeed ee qalalaasuhu hadheeyey ay noqon karto mid soo jiidata siyaasada Maraykanka ee ku aadan geeska Afrika. Laakiin waxaa ku gadaaman

arimo badan oo isku cufan kana durugsan wadahadalada Siyaad Barre la yeelanyo maamulka guriga Cad”

Markii uu Dr. Xuseen Cabdiaahi Bulxan arintaa muuqaal wanaagsanaan karta sidaa u cadeeyey ayuu u gudagaley inuu ka waramo dhibta iyo hagardaamada ay keensan karto Siyaad Barre oo kaalmo dhaqaale iyo hub la siiyo, sidoo kale  aayo xumada ay ku yeelan karto sooyaalka Maraykanka ee ku aadan gargaarida keligii taliye u hub qaadanaya burburka dalkiisa iyo gumaadka dadkiisa.

Waxaanu Dr. Bulxan ku sheegay qoraalkaa “Gargaar kasta oo loo fidiyo Siyad Barre waxay dhib u keensaneysaa dadka Soomaaliyeed badidooda,ayna ku ladhan yihiin arxandaro iyo khiyaamo keli-taliyeed oo galeysa taariikhda wadanka Soomaaliya.Gargaar dheeraad oo loo fidiyo wuxuu  daboolka ku sii haynayaa dheriga karaya ee ay hurinayaan ummad la kala qaybiyey, la cadaadiyey, oo qarkana u saaran dagaal sokeeye”.

Si uu u dareensiiyo maamulka guriga cad in gargaar loo fidiyo dhib mooyee aanu dheef keensaneyn ayuu Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan u soo qaatey siday ka yeeleen bangiga aduunka iyo hay’ada sanduuqa lacagta aduunku, waxaanu yidhi: “ Maareyn-xumida dhaqaalaha danta guud,adeegsi-xumida la sharciyeystay,iyo  si degdeg ah u taajirida Siyaad Bare inta reer ahaan ku dhawdhaw oo dabafoorariyey sanduuqii ummada ka dhexeeyey ayaa keenay in ay soojeedin la dhayasadey ka timaado labada hay’adood ee bangiga aduunka iyo sanduuqa lacagta ee aduunka ilaa gu’gii hore oo loo diidey in dayn la siiyo ilaa uu sameeyo dibu habeyn si gaar ah loo sugay”.

Sidoo kale ayuu  Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan isagoo ka duulaya maahmaahdii aheyd “Ninka qayrkii loo xiirayoow adna soo qoyso” uu Maamulka Maraykanka tusaale ugu soo qaatey in Midawga Soofiyeet  sidan idinku soo aadan ee khiyaamada ahi ay ku


dhacdey, dakada Berberana laga dhigtay  dabinkii lagu soo xero galiyey. Waxaanu yidhi Dr. Bulxan qalinka ku duugay "haddii Keligii talisnimada iyo musuqmaasuqu ay hadheeyeen maamulka Siyaad Barre uun waxaa la odhan lahaa waa hagardaamo ku habsatey Soomaali uun, ee wuxuu Siyaad Barre  sii sugay inuu sidoo kale hagayo maamul aan laheyn mabda', sidoo kale aan laheyn saaxiibtinomo lagu kalsoonaan karo oo ku aadan xidhiidhka dibeda ee dalalka uu la yeeshay.Inqilaabkii gu'gii 1969kii ee uu dalka ku qabsadey Siyaad Barre wuxuu xodxodtay Midawga Soofiyeeti oo uu la galay heshiis noqdey kii ugu horeeyey ee saaxiibtinimo ee Midawga Soofiyeeti la yeesho dawlad ku taala Afrika,kuna galadey in uu saldhiga Berbera adeegsan doono sida uu iminkaba la rabo inay adeegsato dawlada Marykanku. Baaqiisii  Siyaad Bare ee ku aadanaa inuu u heelan yahay mabda' hantiwadaaga cilmiga ku dhisan waxay aheyd dabinkii lagu hoday Midawga Soofiyeeti. Ma jiro wadan maanta uga aqoon badan dabinada (Siyad Barre) maleegayo dawlada midawga Soofiyeeti".

Waxaa halkaa ka muuqata inuu Dr. Xuseen Cabdilaahi Bulxan ka waramey habdhaqanka musuqa iyo gumaadku hagayey ee ka taagnnaa dalkii la odhan jirey Jamhuuriyadii Dimuqraadiga Soomaaliya, sidoo kalena uu si farshaxanimo ku dheehan tahay uga digay Maraykanku inay ku dhacaan dabinkii  boqnaha jarey dawladii Midawga Soofiyetti ee keensadey in muddo kooban dalka lagaga saaro markey ogaadeen dabinada lagu soo xero galiyey iyo sida uu u dhaqmayey maamulkii Siyaad Barre.



Qoraalkani wuxuu sii kaalmeeyey shakigii iyo feejignaantii uu ka qabay maamulka Maraykanku xidhiidh la yeedho dawladii Siyaad Barre oo soo cago jiidmayey ilaa gu'gii 1977kii oon wax kaalmo la taaban karo aan loo fidin.Dawladii Maraykan oo markan go'aan ka gaadhey siday ka yeelayso, siina diyaarsatey sida loola dhaqmayo ayuu maalintii Salaasadii ee ay bishu ku beegnayd 9ka Maarso ee isla gu'gaa 1982kii ka soo dagay cariga Maraykanka. Waxaa go'aan lagu gaadhey in socdaal lagu mashquuliyo oo la geeyo dhawr magaalo oo soo dhaweyn fiican loogu fidiyey. Hase yeeshe 11kii bishaa Maarso ayey kulmeen labada madaxweyne Siyaad Barre iyo Ronald Reagan. Kulan dhoola cadeyn badani ka muuqato iyo qosol aan laabta raad ku laheyn ayaa lagu soo dhaweeyey, halka uu maamulkii Siyaad Barre oo la dhacsanaa kulamada heerka sare ah,ay ku keentay inuu filayey dhaqaale muuqda iyo hub buuran oo la socda ilko cadeyntaa iyo raynraynta lagu qaabiley.

Wareysi uu bixiyey Siyaad Barre isla bishaa Maarso 12dii oo uu soo gudbiyey wargeyska Washington Post ayuu ku sheegay sidan:



Asked if he was satisfied with the level of U.S. aid requested by the administration, Siad Barre said that his meetings with Reagan, Secretary of State Alexander M. Haig Jr. and congressional leaders were "satisfactory, but the amount was not."

" Waa bog cusub oo ay ku ladhan tahay iskaashi dhaw". Hase yeeshee markii la waydiiyey inuu socdaalkiisu noqdey mid midho dhala oo ay u suurtogashay wixii uu ka filayey wuxuu Siyaad Barre yidhi:" kulankii aan la kulmay Reagan, xoghayaha arimaha dibeda ee Alexander Haig iyo xubnaha Kongress-kuba aad bay ii raaligeliyeen, laakiin qadarka gargaarka ay fidiyeen muu laheyn laheyn tiro iyo tayo midna".

Kulan uu la qaatey Siyaad Barre dad reer Soomaaliya oo ku noolaa cariga Maraykanka ee taageersanaa ayuu isagoo canaan ahaana u jeedinaya, sheegayana sababta uu socdaalkiisu u noqon waayey mid midho dhal ah ayuu yidhi: "Dhawr meeshan joogjooga ayaa idinka badiyey oo maamulkii Maraykanka idiinka fara-dhuubnaadey, ha ugu horeeyo Bulxan oo ka soo jeeda Itoobiya, danaha Soomaaliyana ka adeegaya".Waa weedhaha muujiya guuldarada, hase yeeshee eedda iyo gefka ayuu iska jeedinayaa,dushana ka saarayaa bulsho u adeegaysay danihiiisa oo itaal meel xun dhigay.

Weedhaasi waxay si cad u garab taagan tahay weedhihii uu Xasan Sh. Maxamuud kula hadlayey kooxdii taageersaneyd ee uu shirka ugu qabtey cariga Maraykanka,sidoo kale ayey ka muuqatey cadhadii iyo niyadjabkii Siyaad Barre ka muuqdey gu'gii 1982kii. Waxaanu yidhi: "u codeeya xisbiga Jamhuuriga oo dadaalkiina isku geeya, kama tamar yaridiinee".

Ma dhoobadooda meel laga wada qaadey mise colaada iyo dhaqan xumada ayey wadaagaan,yaase ku carbiyey hab-dhaqankaa.Waa hab-dhaqan hadoodilan oo Maafiyadii Talyaanigu ku barbaarisay,ayna ku anqariyeen.

galool iyo maraa iyo hashaan kidiga geylaanshey
gaajiyo harraad badan hashaan ugu garaacaayay
goobtuu sidkeedii go'ay galabtii foolqaaday
ayadoo candhada giijisay oo godol ku sii deysay
Garaad midan lahayn bay la tahay waad ka gaagixine
annagoo gantaalaha dhaciyo haysan qori gaaban
hashaan gaadda weynow libaax uga gaboon waayey
Inaan Garayacawl uga tagaa waa hal soo gudhaye.

Abwaan Cabdilaahi Suldaan "Timacade" -IHUN-

Tixraac:

-Wargeyska New York Times - Maarso 5, 1982

-Wargeyska Washington Post - Maarso 12,1982

-Qolka Kaydka Mareegta Farshaxan

-Wareysi aanu ka qaadney Dr.Xuseen Cabdilaahi Bulxan

Diyaarintii iy Tifatirkii:

Fu'aad Sh. Abuubaker

Bahda Mareegaha Farshaxan

www.Farshaxan.com iyo www.Farshaxan.org